Guddiga koroonaha

Guddiga waxa lagu magacabaay shir xukuumadeed oo dhacay 24. Abriil 2020




# Maarayntii safmarka koroonaha ee dawladda

Gudoomiyaha Guddiga Stener Kvinnsland

Oslo 14. Abriil 2021

# Qiimayn la sameeyey xaaladda adag oo weli socota

- Xaalad adag oo aan hore loo arag
- Cid kasta way taabatay, laakiin dhibta looma sinnaan
- Carruurta iyo dhallinyarada ayaa culays weyn ku yimi, waxaana xoog u kordhay shaqo la’aanta
- Weli ma ogin waxa cawaaqibka fog ee safmarku noqon doono

# NOU 2021: 6
# Maarayntii safmarka koroonaha ee dawladda

- Warbixin mug weyn
- Baadhitaan iyo qiimayn
- Waxyaalaha soo baxay, qiimayn, casharro laga baran karo iyo talooyin
- Guddigu wuu ka midaysan yahay dhammaan qaybaha warbixinta
- 17 farriimood oo guud – cutubka 2.2 ee warbixinta

# Shaqada guddiga

- Guddi madaxbannaan oo la magacaabay 24. Abriil 2020
- Xilsaarid aad u balaadhan:
  - In qiimayn qotodheer oo dhammaystiran lagu sameeyo qaabkii ay dawladdu u maaraysay cudurka koroonaha ee safmarka ah
  - U kuurgalka dhinac kasta oo khuseeya maaraynta
- Koobista shaqada
- Habka shaqada;
  - Kulammada guddiga, inta badan dhigitaal ahaan
  - U kuurgalka dhukumentiyada, soo jeedinno, waraysiyo, igmasho cid kale



# Maaraynta – waxyaalo soo baxay



# Dawladdu guud ahaan si wacan ayay u maaraysay safmarka

- Siyaasiinta iyo madaxda laamaha caafimaadku waxay muujiyeen go’aan qaadasho waxaanay si degdeg ah u sameeyeen isbeddel ku haboon xaaladda markii cudurku si aad ah u faafay Maarso 2020.

- Dhimashadu way yar tahay, dhaqaalahana waxa ku yimi khasaare ka yar inta soo gaadhay waddamo kale oo Yurub ah

# Lama guulaysteen dadweynaha la'aantii

- Bulshada Norway si wacan ayay ugu qalabaysnayd xaalad adag oo timaada

    - Adeegyada caafimaadka waxa heli kara cid kasta

    - Habka bulshada Norway u dhisan tahay ayaa noqotay awood

    - Dadweynaha waxa ka dhexeeya is aamminid, dawladana way ku kalsoon yihiin

# Marka la eego xaaladdii ay ku jireen, sax ayay ahayd in tallaabooyinka adag la soo rogo 12. Maarso 2020

- Cudurku degdeg ayuu u faafayey waxaana jirtay is-qaadsiin aan la raad-raaci karin
- Saluugsanaan ku soo kordhaysay dadweynaha iyo kalsoonidii lagu qabay dawladda oo hoos u dhacaysay
- Sax ayay ahayd in go’aan la qaato intii la sugi lahaa xog dheeraad ah

# Siyaasiinta ayaa dabada ka riixayey in bulshada lagu soo rogo xayiraad 12-kii Maarso

- Xafiiska Raysalwasaaraha ayaa dabada ka riixayey tallaabooyin ka hortag cudur ah oo balaadhan
- Wasiirka caafimaadka ayaa dabada ka riixayey tallaabooyin ka hortag cudur ah oo balaadhan
- FHI way ka walaacsanayd – ma rabin tallaabooyin sidaas u adag
- Agaasinka Caafimaadku wuu rabay tallaabooyin adag, laakiin ma ay diyaarin

# Wakhtiga ayaa la isugu yareeyey si aan loo baahnayn

- Janaayo ayay FHI sheegtay in cudurku iman doono Norway
- Febraayo ayuu Agaasimaha caafimaadku sheegay in la soo rogi karo tallaabooyin adag
- Laakiin haddana ma jiro raad muujinaya in qiimayn lagu sameeyey cawaaqibka bulshada ka hor intaan la xidhin bulshada.
- Wasaarradaha kale lagama qaybgelin hawsha wixii ka horreeyey 12-kii Maarso
- Waxay ahayd in xukuummadu gaadho go’aankii soo baxay 12-ka Maarso

## Dib-u-furiddii ayaa ka qorshe wacnayd xayiriddii, laakiin…

- Xukuumaddu deyrtii 2020 ma ay haynin qorshe lagu joojiyo faafitaanka cudurka ee ka imanayey dibedda
- Xukuumaddu xeerar ayey u samaysay safarrada shaqada iyadoo u samaynin nidaamyo wacan oo lagu hubin karo ku dhaqanka
  - Degmooyin hawluhu ku bateen ayaa lahaa masuuliyadda kormeerka
  - Markii Hay'adda Kormeerka Shaqooyinka la siiyey masuuliyadda, waxa ay ogaatay waxyaalo waaweyn oo ahayn sidii la rabay
- Markii xukuumaddu soo rogtay hubin xuduudeed oo ka adag sidii hore, ma ay lahayn farsamo ay ku hirgeliso


# Doorrar aan kala caddeyn

- Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka ayaa Agaasinka Caafimaadka u xilsaartay isuduwidda hawlgallada laamaha caafimaadka, laakiin iyadaa guud ahaan iskeed u samaysay isuduwidda
- FHI iyo Agaasinka Caafimaadku waxay isku soo farageliyeen hawlahooda
  - FHI waxay ka gudubtay doorkeedii ahaa aqoon-soo-gudbinta
  - Agaasinka Caafimaadka looma diyaarin buuxinta kaalintii masuuliyiinta caafimaadka looga baahnaa ee hawlaha ka hortagga faafidda cudurka.
- Wasiirka caafimaadku ma kala caddayn shaqooyinka la kala leeyahay ilaa la soo gaadhay 11-kii desember 2020
- Inkastoo doorrarku kala caddayn haddana si wanaagsan ayay u wadashaqeeyeen

# Xukuumaddu sidii la rabay uma tixgelin degmooyinka

- Degmooyinka waxa ku soo aaday hawlo ka badan intii la filayey in ay diyaar u ahaadaan
  - Hakin cudur iyo TISK (tijaabo-qaadis, gooni-u-bixid, raad-raac iyo karantiil) *muddo soconayaa* marnaba ma ahayn qayb ka mid ah qorshayaasha
- War-saxaafadeedyada xukuumadda ayaa muddo dheer degmooyinka u ahaa ilaha keliya ee ay ka ogaan karaan tallaabooyinka laga rabo in ay degdeg u fuliyaan
- Degmooyinku ma helin taageeradii ay u baahnaayeen si ay u fuliyaan TISK
- Xukuumaddu waxay mudnaanta siisay cisbitaallada markii la qaybinayey qalabka ka hortagga cudurka
- Wakhti dheer ayey qaadatay in nidaamyo loo sameeyo degmooyinka

# Diyaar ahaanta iyo heeganka – waxyaalo soo baxay



# Xogogaal, aan diyaar ahayn

Dawladdu way ogayd in cudur safmar ah ahaa dhibaato heer qaran ah oo dalka ka dhacda tan ugu dhow in ay timaaddo, taas oo geysan doonta waxyeellada ugu badan.

Waa dayacaad weyn in aysan diyaar ahayn markii uu cudurka safmarka ah ee covid-19 yimi waddanka

# Ma jirin heegan ku saabsan tallaabooyin balaadhan oo ka hortag cudur ah

- Xeerka ka hortagga cudurrada faafa waxa uu oggol yahay in xayirid lagu soo rogi karo qaybo badan oo bulshada ka mid ah
- Haddana xukuumaddu ma u diyaargaroobin isticmaalka *tallaabooyin noocaas ah*
  - lama helin sharraxaadaha xaaladdo laga sii fekeray
  - lama helin qorshayaal
  - lama helin tababbaro la sameeyey

# Xukuumaddu ma samayn qiimayn guud oo ku saabsan saamaynta uu cudur safmar ah ku yeellanayo bulshada

- Laamuhu way qiimeeyeen halista waxaanay dejiyeen qorshayaal lagu maareeyo xaaladaha adag
- Xukuumaddu ma qiimayn sida cawaaqibka laamaha kala duwan isu saamaynayaan
- Laamuhu waxa ay qorshaha ku saleeyeen in boqolkiiba 25 ilaa 40 geli doonaan maqnaansho xanuun. Waxa muuqata in lagaba sii fekerin xaaladda adag ee waddanku geli doono markaas oo kale
- Xataa haddii aan xayiridda la samayn, bulshada ayaa iskeed u istaagi lahayd. Ma aanu arag qorshayaal ama sharraxaado ku saabsan xaaladdo laga sii fekeray oo ku talogalay xaalad noocaas ah

# La'aanta qalabka ka hortagga cudurka oo aan ahayn wax sahlan

Dawladdu way ogeyd in haddii cudur safmar ah dillaaco in ay aad ugu badan tahay in ay adkaan doonto sidii lagu heli lahaa qalabka ka hortagga cudurrada.

Laakiin haddana bakhaarradu way madhnaayeen

# Waxay iska indhatireen digniinno iyaga ka yimi

- Dib-u-eegistii cudurkii safmarka ahaa ee sars ee 2003-dii iyo eboolihii dillaacay 2015-kii labaduba waxay caddeeyeen in uu adduunka ku yaraan karo qalabka ka hortagga cudurrada
- Laakiin qorshaha keliya ee u yaallay wuxuu ahaa in qalab sidii caadiga ahayd looga soo iibsado suuqyada adduunka.
- Dawladdu waxay ku guulaysatay in ay qalab ku hesho qaabab aan waafaqsanayn wadooyinkii caadiga ah
- Haddii uu cudurku isku mar ka dillaaci lahaa Shiinaha iyo dunida inteeda kale, xaaladdu aad ayay u adkaan lahayd.

- **Xaaladda adag ee dambe waxay noqon kartaa nooc kale**
- **Lama hubo in casharrada laga bartay xaaladan si toos ah loogu isticmaali karo xaaladda tan ku xigta**
- **Cudurkii safmarka ah weli ma tegin**
- **Arrimo badan ayaan qiimayn lagu samayn karin ilaa safmarku dhamaado**




 Warbixinta waxa laga dalban karaa www.publikasjoner.dep.no 